

**DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**



**Wasaarada Tamarta iyo Khayraadka Biyaha**

**Mashruuca Adkeysiga Biyaha hoose ee Dhulka – Beriga  
Afrika (P174867)**

**Qorshaha Deegaanka iyo ka Go'naanshaha Bulshada  
(ESCP)**

Maarso 23, 2022

## **Qorshaha ballanqaadka Deegaanka iyo Bulshada:**

1. Jamhuuriyadda Federalka ee Soomaaliya, (“**Qaataha**”), waxa ay fulin doontaa Mashruuca Adkeysiga Biyaha hoose ee Dhulka ee geeska Afrika iyadoo lasii marinayo Wasaarada Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, heer Federal iyo heer maamul goboleedba. Ururka horumarinta caalamiga ah (IDA, oo halkan ka dib loogu yeedho “**Ururka**”) waxa uu ogalaaday maalgelinta mashruucaas.
2. Qaatuha “Hele” waxa uu fulin doonaa cabbirka qalabka mashruuca iyo tallaabooyinka lagu fulinayo si waafaqsan ee heerka deegaanka iyo bulshada (Heerarka deegaanka iyo Bulshada ESSs) ee Bangiga Adduunka. Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP) waxa uu dejinayaa, cabbirada, ficillada iyo dukumeenti kasta oo gaara ah (specific documents) ama qorshaynta iyo wakhtiyeynta mid kasta oo ka mid ah kuwan.
3. Qaatuha “Hele” waxa uu sidoo kale u hoggaansami doonaa qodobada E&S sidoo kale dukumeentiyada (documents) looga baahanayahy, qaabdhismeedka deegaanka iyo bulshada (ESF) taasoo lagu tilmaamay Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP) ayna ku jiraan:
  - a. Qorshaha ka qayb galka daneeyayaasha (SEP), qaab-dhismeedka maamulka bulshada ee deegaanka (ESMF), qaabdhismeedka siyaasadda dib-udejinta (RPF), taas oo loo diyaariyay mashuurca iyo.
  - b. Hannaaka maamulka shaqaalaha (LMP), uga faa’idaygsiga galmo, xadgudub iyo dhibaatayn (SEAH), qorshaha ka hortagga, ilaalinta iyo maamaraynta guud ee amniga mashruuca (SMP), iyo odorosidda khataraha amni iyo maaraynta qiimaynta khataraha amni ee ka iman kara degmo, sidoo kale maaraynta qorshaha gaarka ah maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs), maamulka amniga iyo qoryshayaasha baadhisyo kasta oo kale, taas ooy ku jiraan habraacyada iyo noocyada loo diyaariya mashruuc hoosaadyada, hawlqabadyada mashruuca iyo waqtiyada lagu sheegay dhukumantiyada (documents.) E&S.
4. Qaatuha “Hele” ayaa ka masuul ah hoggaaminta dhammaan shuruudaha laga rabo, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka ESCP, tallaabooyinka iyo shaqooyinka gaarka ah ee ay qabanayso wasaaradda tamarta iyo khayraadka biyaha (MOEWR) ama cid kasta oo ku hadasha wasarada ama qaatayaasha.
5. Higelinta tallaabooyinka, iyo hawlqabadyada lagu sheegay, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka ESCP, waa la kormeeri doona, lana diiwaangelin doonaa, cidda qaadatay iyadoo la raacayo heshiiska sharciga, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP). Sidoo kale ururku waxa uu la socon doonaa, horumarka iyo dhammaystirka tallaabooyinka iyo qalabka lagu hirgeliyao mashruuca.

6. Sida ay ku heshiiyeen ururka iyo qaatahu, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP) dib ayaa loo qiimaynayaa waqti ka waqti inta lagu dhex jiro fulinta mashruucan, si loo muujiyo maaraynta, la qabsiga isbeddelada ku yimaada mashruucan iyo duruufaha lama filaanka ah ee soo waajaha, iyadoo laga jawaabayo qiimaynta lagu sameeyay mashruuca, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP). Xaaladahan oo kale marka ay yimaadaan, iyadoo la marayo wasiirka ka masuuka ah wasaarada Tamarta iyo khayraada Biyaha, waxa uu laga heshiin doonaa isbeddelada ururka, waxa uuna cusboonaynsiin doonaa, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP) Iyadoo lagu muujiyay isbeddelka. Heshiiska waa lais dhaafsan doonaa iyadoo lakala saxeexanyo waraaqo, ayna kala saxeexan doonaan ururka iyo wasiirka wasaarada Tamarta iyo khayraadka biyuhu. Wasaaraddu waxa ay si degdeg ah u shaacin doontaa cusboonaynsiinta, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP), iyadoo u ku shaacin doonta website-keeda si guud.
  
7. Haddii mashruucu isbeddelo, duruufo lama filaan ahina yimaadaan, ama maxsuulka mashruucu keeno saamayn deegaan iyo mid bulsho iyo saamaynta timaada inta lagu gudo jiro shaqada, qaatahu (hele) waxa uu bixin doonaa kharash dheeraad ah haddii loo baahdo, si loo keeno tallaabooyin wax looga qabanayo khatarahaas yimi. Waxa saamaynahaas ku jira mid deegaanka ah, bulshada, caafimaadka, shaqaalaha, khataraha amni iyo bulsho. Shaqaalaha mashruuca, hantida, dhulwareejinta iyo saamaynta dib u dejina, iyo tacaddiyada, iyo xad gudubyada dhanka galmada (SEAH).

Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka.	Waqtiga	Ha'yadda ka masuulka ah	
<b>Kormeerid iyo warbixin</b>			
A	<p><b>Warbixin joogto ah:</b>            Diyaarin iyo soo gudbin warbixinta kormeerka ee joogtada ah, taasoo ku saabsan deegaanka, arrimaha bulshada, caafimaadka iyo badqabka (ESHS) ee waxqabadka mashruuca, taasoo aan ku xaddidneyn hirgelinta qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka ESCP; heerka diyaarinta iyo hirgelinta ee xogaha ee E&amp;S, ka qaybgalka daneeyayaasha iyo diyaarinta habka cabashada.</p> <p>Dawladda xubnaha ka ah dawladda federaalka waxa looga baahanyahay in ay ka warbixiyaan, qaybta maamulka mashruuca, Unugga Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka. (NPCU)</p>	<p>Lixbiloodle, inta lagu gudo-jiro mashruucan.</p> <p>Bille ah.</p>	<p>Unugta Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU) oo kaashanaya Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta,</p>
B	<p><b>Ogaysiiska shilalka iyo dhacdooyinka:</b>            Si degdeg ah u ogaysii ururka shil kasta ama shil kasta oo la xidhiidha mashruuca, kaasoo laga yaabo in uu saamayn xun ku yeesho deegaanka, bulshada ama shaqaalaha. Si degdeg ah u ogaysii kana bixi tafaasiil waafi ah, oo ku saabsan shilka, tallaabooyinka la qaaday ama kuwa qorsheysan ee la qaadi rabo, iyo xog-kasta (macluumaad) oo ay bixiyaan qandaraaslayaasha ama hay'daha kormeerku.</p> <p>Intaa ka dib, ka samee warbixin shilka, soona jeedi tallaabo kasta oo lagaga hortagi karo soo noqoshada shilka.</p> <p>Diiwaangeli dhammaan dhibaatooyinka waqti ku habboon.</p>	<p>Waa in dhacdada ama shilkaas looso gudbiyo warbixintiisa, in ka yar 48 saacadood, iyadoo la raacyo hab-raacyada warbixinta, ee ururku ku wada xidhiidho.</p> <p>Kuna wakhtiyaysan wakhtiga lagu heshiiyay</p> <p>Qayb ka mid ah warbixinta saddexbiloodlaha ah</p>	<p>Unugta Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
C	<p><b>Qandaraaslayaasha iyo warbixintooda oo bille ah:</b>            Sida ku cad warbixinta ururka, waa in qandaraaslayaasha la siiyaa nashaqadeynta, la talinta iyo kormeerka. Kormeerkan billaha ah waa in loosoo gudbiyo sida loo fuliyay. Unugga Iskuduwidda Mashaariicda Qaranka (NPCUs), waa in ay dib eegto warbixinnada qandaraasyada iyo hay'adaha ganacsi ee gaarka loo leeyahay ee fulinaya, si loo xoojiyo arrin kasta oo muhiim inta mashruucu socdo.</p>	<p>Waxa ay ku xidhantahay in ururka laga codsado.</p> <p>Waxa ay ka mid ahaanaysaa warbixinta saddex-biloodka ah, haddii ayna dhicin dhacdo la xidhiidha <b>B</b></p>	<p>Unugta Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
<b>ESS 1: Qiimeynta iyo maaraynta khatara ku iman kara deegaanka iyo bulshada</b>			

<b>Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka.</b>	<b>Waqtiga</b>	<b>Ha'yadda ka masuulka ah</b>
<p><b>1.1 Qaab dhismeedka hay'adda:</b> In la dhiso lana ilaaliyo qaab dhismeedka hay'adaha dawladda federaalka Soomaaliya, taasoo leh shaqaale u qalma shaqada iyo qalab ka taageeraya ka hortagga khataraha. Waa in ay ku jiraan magacaabista gudaha, Unugga iskuduwidda mashaariicda Qaranka NPCUs, isu duwaha mashruuca, kuna jiraan khabiirro kala ah, dhanka iibka, dhanka maaliyadda, dhanka amniga, dhanka deegaanka iyo xadgudubyada la xidhiidha jinsiga (GBV), Mid kastaana uu leeyahay waayo aragnimo 8 sano ah, si buuxana uga hawlhalaya mashruuca.</p> <p>In la dhiso lana ilaaliyo haykalka hay'adaha dawladda federaalka xubnaha ka ah, taasoo leh shaqaale u qalma shaqada iyo qalab ka taageeraya ka hortagga khataraha. Waa in ay ku jiraan magacaabista gudaha Unugga iskuduwidda mashaariicda Qaranka NPCUs, isu duwaha mashruuca, kuna jiraan khabiirro kala ah, dhanka deegaanka, iyo xadgudubyada la xidhiidha jinsiga (GBV), ah Mid kastaana uu leeyahay waayo aragnimo ka badan 5-sano, oo dhanka fulinta mashaariicda ah.</p> <p>Waa in heshiis lala galo shirkad aqoon u leh maareynta khataraha dhanka amniga, inta qandaraasku socdo.</p>	<p>Ka hor inta aan la bixin qaybta 1aad, waa la ilaalin doonaa cidda takhasuska dheeraadka ah leh inta mashruucu socdo.</p> <p>Ka hor inta aan la bixin kharashyada kala duwan ee hoos yimaada qaybta 1aad FMS.</p> <p>Ka hor inta aan la bixin wajiga koobaad.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p> <p>Unugga Hirgelinta Mashruuca ee Maamul-Goboleedka (SPIU)</p> <p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
<p><b>1.2 Qiimeynta deegaanka iyo bulshada:</b> Waa in la diyaariyo lalana tashado, si guud loo shaaciy qorshaha ka jawaabista iyo ka hortagga ee tacaddiyada, iyo xad gudubyada dhanka galmada (SEAH).</p> <p>Waa ina la shaaciy qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada, (ESMF) 27<sup>th</sup> March 2022.</p> <p>Iyadoo la raacayo habraacyada baadhista ee lagusoo sameeyay, qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada ESMF, iyo sii daynta qorshayaasha ballaadhan</p>	<p>Ka hor inta aan la bixin wajiga koobaad.</p> <p>Qorshaha gaarka ah maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs), waxa ay ansixinayaan shaacana ka qaadayaan, qabanqaabada iyo fulinta, ka hor inta aan la hirgelin mashruuc-hoosaadyada u gaarka ah goobta.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashaaruuca ee Qaranka (NPCU) iyo Unugga Hirgelinta Mashruuca ee Maamul-Goboleedka (SPIU)</p>

<p>ee mashruucan, waa ina helo goobo gaar ah oo lagu baadho khataraha deegaan iyo bulsgheed ee iman kara. Qiimaynta mashaariic hoosaadyada taas oo ay ku jiraan deegaanka guud, goob biyeedyo iyo biyo joogto ah oo la helo, loona helo dhul xor ah, oo ka madax bannaan dhammaan xannibaadyada ama loo tartami karo si waafaqsan qaabdhismeedka siyaasada dib-u-dejinta (RPF), lana hubiyo caddaalada iyo isku dhafka dhammaan dadka kaas oo ay ku jiraan inta nugul. Xulashada mashruuc hoosaayada iyo awooda qandaraasyada si ay u fuliyaan mashruuca Qorshaha gaarka ah maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs), iyo qaabaynta warbixinta taasoo ku salaysan diyaargarow iyo la tashi lana shaaciyo goobta maahruuca.</p>		
-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	--	--

<b>Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka</b>	<b>Waqtiga</b>	<b>Ha'yadda ka masuulka ah</b>
<p>Qorshaha gaarka ah maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs), haddii ay u baahato dhul deeq ah, waa in ay heshiisyada dhulkaas dawladdu dhexdhexaadiyo am RAPS</p>		
<p>1.3 <b>Maamulka qalabka iyo aaladaha:</b> Hirgelinta, qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), qaabdhismeedka siyaasada dib-u-dejinta, (RPF), SEP, SMP, qorsha ka hortagga, iyo ka jawaab-celinta, tacaddiyada, iyo xadgudubyada dhanka galmada (SEAH),iyo qorshaha maamulka shaqaalaha (LMP).</p> <p>U cusboonaysii mashruuca SEP si ballaadhan, haddii loo baahdo si guudna u shaaci oo dhaqangeli, qorshaha ka mid noqoshada ururka.</p> <p>Diyaari mashruuca SRA iyo SMP ee fulinta mashruucan. Ballaadhi mashruuca ka hortagga iyo ka jawaab celinta ee</p>	<p>Inta lagu dhex jiro mashruucan, mar haddii kuwo si sax loo qabtay.</p> <p>Sida loogu baahdo inta uu socdo mashruucu, ka hor inta aan la bixin hawla hoos yimaada qaybta laad.</p> <p>Qorshayaasha la ansixiyay iyo qabanqaabada fulinta ee jira ka hor inta aan lasoo saarin codsiga soo jeedinta xidhiidhiyaasha, fulinta hay'adaha. Bilawga mashruuca hoosaadyada, iyadoo la raacayo jadwalka kala duwan ee fulinta</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>

<p>tacaddiyada, iyo xadgudubyada dhanka galmada (SEAH), iyo qorshaha maamulka shaqaalaha LMP, laguna qanacsanyahay.</p> <p>Waa in ay SRAs-ka degmada iyo SMPs, waa in kyu qanacsanyihiin.</p> <p>Diyaarinta iyo shaacinta dhismayaasha mashruuc hoosaadyada, iyo hawlgelinta Hirgelinta, qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs), ayna ku jiraan waxyaabaha loo baahanayahay, kuna jiraan qorshaha ka hortagga iyo ka jawaabcelinta ee tacaddiyada, iyo xadgudubyada dhanka galmada (SEAH). Qorshaha maamulka shaqaalaha (LMPs), qorshayaasha amniga gaarka ah iyo qorshe-hawleedkeeda dib-u-dejinta iyo soo celinta hab nolaleedka (RAP/LRP), sida lagu qeexaya qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF) iyo qaabdhismeedka siyaasada dib-u-dejinta (RPF), ahna hab lagu qanci karo.</p>	<p>tallaabooyinka, yaraynta agabka inta uu socdo mashruucu.</p> <p>Dhammaan sii daynta iyo hagaajinta heerka deegaanka iyo bulshada (ESS), ka hor inta aan dalabaadka la gudbin.</p>	
-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	--

<b>Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka.</b>	<b>Wagtiga</b>	<b>Ha'yadda ka masuulka ah</b>
---------------------------------------------------	----------------	--------------------------------

<p>1.4</p>	<p><b>Maamulka qandaraasyada:</b>  Waa in lagu daro dhinacyada ay khusayso, Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP), ayna ku jiraan dhammaan dukumeentiyo E&amp;S iyo qorshayaasha qorshaha maamulka shaqaalaha (LMP) iyo qorshaha ka hortagga ee iyo ka jawaab-celinta xadgudubyada dhanka galmada (SEAH) iyo mashruuca degmada SRA iyo SMP, laguna daray faahfaahinta dukumeentiyada ESHS, ee faahfaahinta qandaraasyada wax iibsiga, ka dib hubi in qandaraaslaayshu ay u hoggaansameen shuruudaha ESHS, ee qandaraaskooda khuseeya.  Dhaqangelinta habraacyada lagu maareeyo qandaraaslayaasha si'ay u fuliyaan shaqooyinka madaniga ayna ku jiraan kuwan kale;</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Hubi u hoggaansanaanta shuruudca qandanka tusaale; shatiyada lagu shaqeeyo goob walba iyo ujeedada mashruuca.</li> <li>• Shuruudaha deegaan iyo bulshada khuseeya ayaa lagu darayaa habka wax iibsiga iyo qandaraasyada oo ayna ku jiraan (documents) tartanka, qandaraasyada iyo qandaraasyada hoose ee waafaqsan shuruudaha heerka deegaanka iyo bulshada (ESS).</li> <li>• Diyaarinta tafaasiisha qandaraaslayaasha qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo (ESMP) (C-ESMP) ayna ku jiraan kharashka iyo miisaaniyad ku filan si loo yareeyo khataraha E&amp;S muujinaysana awood ku filan oo lagu fulinayo talloobooyinka loo baahanayahy ayna ku jiraan habka tartan.</li> <li>• Xeerarka anshaxa ee (CoCs) ayna ku jiraan qandaraasyada dhismaha, qandaraasyada alaab-bixiyayaasha iyo shaqaalaha buuxinaya shuruudaha adeega caafimaadka iyo badbaadada bulshada (OHS), xadgudubyada la xidhiidha jinsiga (GBV) iyo kuwa amniga.</li> <li>• Kormeerista qandaraaslayaasha iyo u hoggaansanaanta heerka deegaanka iyo bulshada (ESS).</li> <li>• Siinta GRM, ee qandaraaslayaasha iyo alaab bixiyayaasha bulshada, daneeyayaasha iyo shaqaalahaba.</li> </ul>	<p>Ka hor diyaarinta dukumeentiyada wax iibsiga iyo qandaraasyada ugu danbeeyay ee PIU, si loo hubiyo dhammaan qodobada khuseeya, heerka deegaanka iyo bulshada (ESS), taasoo lagu daray miisaaniyaddii loo qorsheeyay inta aan la saxiinin mashruuca.</p> <p>In ay kormeeraan qandaraaslayaasha inta uu mashruucu socdo.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
------------	-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	-------------------------------------------------------



	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Waxa qandaraaslayaasha looga baahanayahy in ay shaqaalaha siiyaan GRM.</li> <li>• Hubi in qandaraaslayaashu iyo alaab gaadhsiiyayaashu in ay bixiyaan tafaasiil ku saabsan kormeerkooda ku aadan waxqabadka dhanka deegaanka, caafimaadka iyo badbaadada ee (ESHS) iyo in warbixin ku filan laga bixiyo shilalka culus.</li> <li>• Kormeer waxqabadka qandaraaslayaasha iyo alaab-gudbiyayaasha si loo hubiyo u hoggaansanaanta shuruucda ESHS, si waafaqsan qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), SEP, qorshaha maamulka shaqaalaha LMP, xadgudubka galmada iyo qorshaha ka hortagga iyo ka jawaabcelinta, qorshaha aminga iyo maamulka goobaha gaarka ah.</li> </ul>		
--	--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	--	--

<b>Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka</b>	<b>Wagtiga</b>	<b>Ha'yadda ka masuulka ah</b>	
1.5	<p><b>Kormeer:</b> Wasaarada tamarta iyo khayraadka biyaha (MoEWR), waa in ay si joogto ah ula socoto khataraha saamaynta ku leh deegaank, bulshada iyo shaqaalaha si loo hubiyo u hoggaansanaanta, taasoo waafaqsan ESHS iyo shruudaha ansixinta awooda iyo warbixinada sida ku cad Qorshaha u hoggaansanaanta bulshada iyo deegaanka (ESCP) lana qaado tallaabooyinka lagam maarmaanka ah.</p>	Inta uu socdo hirgelinta/fulinta mashruucu.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU), Unnugga Hirgelinta Mashruuca ee Maamul-Goboleedka iyo shirkadda tayaynta.
1.6	<p><b>Fulinta mashruuca ee Somaliland:</b> ka hor inta aan la bixin mashruuca Somaliland,</p>	Ka hor inta aan la bixin kharashaadka lana bilaabin fulinta mashaariicda ka socda Somaliland.	

	<p>(a) E&amp;S waa in ay qalabka Somaliland habeeyso, qaatuhuna waa in uu hubiyo:</p> <p>(i) waa in ay ku jiraan qabanqaabada hay'daha mas'uulka ah qiimaynta khataraha maaraynta E&amp;S</p> <p>(ii) (ii) Waa in ay ku jiraan txiraacyada qalabka E&amp;S iyo qorshayaasha lagu sheegay cutubka hore ee 1.2.</p> <p>(b) Qaatuhu waa in uu muujiyaa hab lagu ganacsanyahay, si mashruuca looga fuliyo Somaliland ayna ku jiraan maaraynta khataraha E&amp;S, waafaqsanna heerka deegaanka iyo bulshada (ESS).</p>		
1.7	<p><b>SHURUUDAHA KALA SAARIDDA:</b></p> <p>Noocyada soo socda ee waxqabadyada ahi uma qalmaan maalgelinta:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Shaqooyinka soconaya waqti dheer ama aan laga laaban karin, yeelanna kara saamayn deegaan iyi mid bulsho (tusaale; luminta deegaan dabiici ah oo muhiim ah, qulqul xoogan oo keeni Kara cunto yaraan, biyo yaraan iyo barakac aan rasmi ahayn.</li> <li>• Shaqooyinka keenaya saamynta xun ee caafimaadka aadamaha iyo deegaanka ama keenaya rabshadaha iyo xaddidaada khayraadka muhiimka ah, iyo qabashada dadka haldoorka ah iyo takoorka.</li> <li>• Xaalada laga yaabo in ay keenaan saamayn bulsho sida khilaafka dhulka iyo helitaanka biyaha.</li> <li>• Hawlaha laga yaabo in ay saamayn ku yeeshaan dib-u-dejinta xooggan ama barakac ballaadhan, in ka badan 10 qoys oo nugul.</li> <li>• Hawlaha saamaynta ku yeelan Kara dhaxalka deegaan leeyahay ayna ku jiraan goobaha bulshooyinka muhiimka u ah.</li> </ul> <p>Dhammaan dhaqdhaqaaq kasta oo laga reebay mashruuca sida ku cad qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), waa in lagu wargeliyo lagalana tashado daneeyayaasha.</p>	Inta uu socdo hirgelinta mashruucu.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)

Qalabyada la isticmaalayo iyo shaqooyinka.	Waqtiga	Ha'yadda ka masuulka ah
<p>1.8 <b>Gargaarka farsamo:</b> Waa in la hubiyo daraasaadka la talinta, (ayna ku jiraan daraasaadaha suurto galka ah ee khseeya mashruuca) waa in la bixiyo tababaro aqoon korodhsi ah iyo kaalmooyin farsamo o ee hoos yimaada mashruuca;</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Waa in lagu fuliyo si waafaqsan shuruudaha tixraaca ee heerka deegaanka iyo bulshada (ESS), ka dibna waa in la hubiyo wax soo saarka hawlaha ayna waafaqsanyihiin shuruudaha tixraaca.</li> <li>2. In shuruudaha shaqada ee dhammaan shaqaalaha bixiya adeegyada hoos yimaada hawlaha TA, waafaqsanna heerka deegaanka iyo bulshada (ESS2) iyo sharciga Soomaaliya ayna ku jiraan caafimaadka iyo badbaadada bulshada (OHS), badbaadada iyo habka helitaanka cabashada ee shaqaalaha iyo qorshaha maamulka shaqaalaha (LMP) marka la aqbal.</li> </ol>	Inta uu socdo hirgelinta mashruuca.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)
<b>ESS 2: SHAQAALAHA IYO XAALADOODA</b>		
<p>2.1 <b>Nidaamka maaraynta shaqaalaha (LMP):</b> Qorshaha maaraynta shaqaalaha (LMP), waa in ay horumariso habka wax looga qabanyo khataraha shaqada taas oo aan xaddidnayn:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Shruudaha adeegga.</li> <li>• Xeerka anshaxa.</li> <li>• Tallaabooyinka shaqada ee la xidhiidha caafimaadka iyo badbaadada.</li> <li>• Tallaabooyinka ka hortagga covid19.</li> <li>• Ilaalinta ubadka iyo ku qasbidda shaqada.</li> <li>• U diyaar garoobidda ka jawaabista degdega ah.</li> <li>• Habka xallinta cabashooyinka ee shaqaalaha mashruuca.</li> <li>• Ku Tababarida shaqaalaha mashruuca arrimaha mudnaanta leh ayna ku jiraan caafimaadka iyo</li> </ul>	Ka hor inta aan la bixinta qaybta 1aad.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)

	<p>badbaadada bulshada (OHS) iyo xadgudubyada la xidhiidha jinsiga (GBV).</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Maareynta qulqulka shaqada.</li> </ul>		
2.2	<p><b>Hannaa cabashada ee shaqaala mashruuca:</b>  Horumari oo ilaali shaqaalaha tooska ah iyo shaqaalaha qadraaska ku jooga, sida lagu qeexay Qorshaha maaraynta shaqaalaha (LMP) iyo sidoo kale habka cabashooyinka qarsoon ee xadgudubyada la xidhiidha jinsiga (GBV) iyo xad gudubyada dhanka galmada (SEAH).</p>	Ka hor inta aan shaqaalaha la shaqaalaysiin.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU) iyo Uungga Hirgelinta Mashruuca ee Maamul-Goboleedka
2.3	<p><b>Hannaa ka badbaadada iyo caafimaadka ee shaqaalaha (OHS):</b>  Waa in la hirgeliyo tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada bulshada (OHS), waafaqsanna xeerka Baanka adduunka ee EHS oo qaybka ah ayna ku jiraan Qorshaha maaraynta shaqaalaha (LMP), Waxaana ka mid ah, fulinta tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada bulshada (OHS), laguna daray cabbirada SMP, qorshaha ka hortagga iyo ka jawaabista iyo xad gudubyada dhanka galmada (SEAH), shuruudaha ESHS ee wax iibsiga qandaraasyada iyo qandaraaslayaasha.</p>	Ka hor inta aan la bixin qaybta 1aad.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)
<p><b>ESS 3: U adeegsiga khayraadka sida ugu wanaagsan, ka hortagga wasakhawga iyo maarayntiisa.</b></p>			

	<b>Qalabka la isticmaalayo iyo shaqooyinka.</b>	<b>Wagtiga</b>	<b>Ha'yadda ka masuulka ah</b>
3.1	<p><b>U adeegsiga khayraadka sida ugu wanaagsan, ka hortagga wasakhawga iyo maarayntiisa:</b></p>	Si waafaqsan qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), diyaari qaataha unasoo bandhig si guud qaabdhismeed maamulka	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)

	U adeegsiga khayraadka sida ugu wanaagsan, ka hortagga wasakhawga iyo tallaabooyinka maaraynta ayaa lagu dabooli doona qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs) lagu darayaa farqadda saree e 1.3.	deegaanka iyo bulshada (ESMPs), ka hor inta aan la fuli mashruuc hoosaadyada.  Kormeer hirgelinta qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMPs) inta lagu jiro fulinta mashruuca.	
3.2	<b>Wareejinta khayraadka biyaha ee dhulka hoostiisa:</b> Ku rakib qulqulka biyaha ee ceelasha halka ay kasoo baxayaan, siaad u diiwaan geliso xaddiga biyaha ee maalinlaha ah, sidoo kalana ku xidh tuunbada ceelasha si'aad ula socoto heerka biyaha ee ceelasha la qoday.	Sida ku cad qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), ka hor inta aan ceelsha lagu wareejin bulshada iyo inta mashruucu socdo.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)
3.3	<b>Hubinta biyaha ku habboon cabitaanka:</b> Dhammaan ilaha biyaha ee laga fuliyo mashruucan waa in lagu sameeyaa tijaabooyinka tayada biyaha la cabbi-karo (physio-chemical and microbiology parameters) ay buuxiyaan heerka cabbirka biyaha ku habboon cabitaanka ee haayada caafimaadka adduunak (WHO), ka hor inta aan lagu wareejin bulshada. Waa in la sameeyo wakhtiyo kala duwan tijaabooyin la xidhiidha tayada cabbirka biyaha (physio-chemical and microbiology parameters)	Ka hor inta aan ceelsha lagu wareejin bulshada si'ay u isticmaalaan.  Saddex biloodba mar inta lagu guda jiro mashruuca.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU), SPTs
3.4	<b>WAARAANSHAHA BIYO-SOO-SAARKA:</b>  Wax qabadyada suurto galka ah ee (ceelasha iyo riigaga), waxa ay ku xidhnaan doontaa qiimayn iyo joogtayn la sameeyay lana ansixiyay si loo hubi in maalgelintu ayna wax dhib ah u keeni doonin khayraadka jira, ama keeni Karin saamayn taban oo dibadda u baxda, taasoo saamaysa biyo mareenada, kan baxan saamayntii la qiimeeyay, laguna sifeeyay OP7.50 memo. Sida lagu wargeliyay waddamada dooxada.	Shuruudaha hore ama qayb ka mid ah goobta gaarka ah qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada (ESIA)	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)
<b>ESS 4: Caafimaadka iyo badbaadada bulshada.</b>			
4.1	<b>Caafimaadka iyo badbaadada bulshada:</b> Waa in la hirgeliyo tallaabooyin lagu qiimaynayo sida loo maareeyo khataraha gaarka ah iyo saamaynta ay bulshada ku yeelanayaan iyo mashruucaba, taasoo ay ku jiraan khataraha qulqulka shaqada iyo khatarta cudurada faafa sida (COVID-19 and HIV/AIDS). Si looga jawaabo xaaladaha iska hor imaada iyo xaaladaha ay sababaan musiiibooyinka	Si waafaqsan qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF), waa in si guud loosoo bandhigo lana diyaaro, ka hort inta aan la gudbin dalabyada.	Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)

	<p>dabiiciga ahi, khataraha ku iman kara dhismayaasha iyo kuwa y sababaan taraafikadu iyo badbaasad jidadka ayna ku niraan tallaabooyinka qaabdhismeed maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMP)-loona diyaarsho si waafaqsan lana aqbali karo, qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMF).</p>	<p>Waa in la kormeero inta uu masruucu socdo.</p>	
<p>4.2</p>	<p><b>Xadgudubyada Jinsiga iyo ku-tagri-falka Galmada:</b>  Waa in la diyaaro lagana talayo bixyo qorshe gaar u taagan oo ka hortagaya xadgudubyada Galmada, iyo tacadiyada ah, si guudna loo shaaciy qorsha ka Hortagga iyo ka jawaabista ee xad gudubyada dhanka galmada (SEAH).  Tallaabooyinka muhiimka ag waxa ku jira;</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>○ Xeerarka Anshaxa, shaqaala mashruuca iyo kuwa qandaraaska la siiyay iyo qorshaynta kor u qaadista wacyigelinta bulshada iyo tababarka tayaynta shaqaalaha ka shaqaynaya Xeerarka Anshaxa and adgudubyada la xidhiidha jinsiga GBV/ ka jawaabista ee xad gudubyada dhanka galmada SEA.</li> <li>○ Qaabaynta iyo horumarinta iskaashi ee la yeelanayo adeeg bixiyaasha GBV ee la aqoonsaday.</li> <li>○ Diyaarinta qaabdhismeedka warbixnta iyo ka jawaabista taasoo qeexaysa shuruudaha muhiimka ah ee a warbixinta kiisaska dhacaan iyo tallaabooyinka laga falcelinayo badbaadada si waafaqsan anshaxa.</li> </ul>	<p>Waa in la diyaariyo lagana tashado, lana shaaciy si guud inta aan la bixin qaybta laad. Ka dibna la fuliyo inta lagu jiro muddada mashruuca.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>

- Diyaarinta qaab-dhismeedka isla xisaabtanka kaasoo lagu qeexay, unuga ka masuulka ah mashaariicda qaranka (NPCU), qandaraasluha waxa wax ka qaban doonaa eedamyaha ay ku jiraan (iyadoo la raacayo habraacyada qaranka) iyadoo xannibaad la saarayo danbiilayaasha.
- Dajinta habraacyo iyo kanaalo loogu talagalay warbixnta sirta ah iyo warbixnaha la xidhiidha adgudubyada la xidhiidha jinsiga GBV eek u xidhan GRM, kaasoo awood siinaya shaqaalaha GRM sida looga jawaabo kiisa soo baxa.

Waa in horumar iyo tallaabooyin dheeraad ah la keeno si wax looga qabto dhibaatooyinka la xidhiidha galamda iyo dhibaataaynta habka la xidhiidha qorista shaqada.

Caddaynta shuruudaha adgudubyada la xidhiidha jinsiga GBV iyo (documents) laga rabo, tartanka qandaraasyada dhismaha, waxa ay gelyaan shuruudaha Xeerarka Anshaxa, tababarka shaqaalaha iyo kharashaadka GBV sida loo dabooli doono qandaraaskan.

Qiimaynta tartamaaysha, taasoolagu daray soo jeedinta jawaabaha adgudubyada la xidhiidha jinsiga GBV.

Hubinta in la helo maalgelin dheeraad ah si loo fuliyo tallaabooyin wax looga qabanayo adgudubyada la xidhiidha jinsiga GBV/ ka jawaabista ee xad gudubyada dhanka galmada SEA, iyo khataraha ka dhaln kara in mashruucu socdo.

4.3	<p><b>Amniga/Bedqabka:</b></p> <p>Diyaarinta, qaadashada iyo hirgelinta qorshaha qiimaynta iyo maaraynta Khatarta amniga ee waafaqsan kuna habboon shuruudaha iyo halbeegyada deegaanka iyo kuwa bulshadda ee qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada (ESS4).</p> <p>Diyaarinta, qaadashada iyo hirgalinta Qiimaynta Khatarta Amniga Degmada iyo Qorshayaasha Maareynta Amniga ee waafaqsan, kuna habboon shuruudaha iyo halbeegyada deegaanka iyo kuwa bulshadda ee qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada (ESS4).</p> <p>Diyaarinta, qaadashada iyo hirgelinta Qiimaynta Khatarta Ammaanka ee Gaarka ah iyo Qorshayaasha Maaraynta Amniga ee waafaqsan shuruudaha iyo halbeegyada deegaanka iyo kuwa bulshadda ee qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada (ESS4).</p> <p>Tallaabooyinka soo socda waa in la qaadaa, si loo hubiyo ka-qaybgalka ciidamada iyo kooxda amniga ee bixinta hawlaha amniga ee shaqaalaha mashruuca, goobaha iyo hantida, loona fuliyo si waafaqsan halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada (ESS).</p> <p>a) Qiimaynta khataraha iyo saamayntooda, hawlgelinta ciidamada iyo kooxaha amniga taasoo qayb ka ah qiimaynta lagu sheegay qodobka 1.3 c) ee xagga sare ku xusan, iyo in la fuliyo tillaabooyinka lagu maaraynayo khatarahaas iyo saamayntooda, Qorshaha Maaraynta Amniga, oo ay hagto halbeegyada deegaanka iyo kuwa bulshada, mabaadi'da saamiga iyo GIIP, iyo sharciga lagu dabaqi karo, ee la xiriira shaqaaleysiinta, xeerarka anshaxa, tababarka, qalabaynta, iyo la socodka kooxda ammaanka.</p> <p>b) Dhaqangelinta halbeegyada, hab-maamuuska iyo xeerarka hab-dhaqanka ee xulashada iyo isticmaalka ciidamada iyo kooxaha amniga iyada oo la marinayo baaris shaqaalahaas si loo xaqiijiyo in aanay hore ugu lug-lahayn dhaqan-xumo iyo falal sharci darro, sida ka-faa'iidaysiga iyo xadgudubka galmada (SEA), dhibaatooyin galmo (SH) ama xoog isticmaal xad dhaaf ah.</p> <p>c) Xaqiijinta in unuga fulinta mashruucu saxiixo is-afgarad (MoU), iyadoo Wasaaradda Amniga iyo NISA ay dejinayaan habka ciidamada iyo kooxaha amnigu ugu lug yeelanayaan Mashruuca, iyada loo hoggaansamayo shuruudaha la xiriira qorshaha ballanqaadyada deegaanka iyo kuwa bulshada (ESCP).</p>	<p>Ka hor inta aan la bixin qaybta 1<sup>aad</sup>.</p> <p>Ka hor xaqiijinta goobta ee goobaha mashruuca.</p> <p>Ka hor inta aan la soo saarin dukumentiga tartanka qandaraaslayaasha ee hawlaha hoos yimaada qaybta laad.</p> <p>Ka hor inta aan la bilaabin habraaca qandaraaslayaasha ee degmo gaar ah.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
-----	---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	-------------------------------------------------------



	<p>d) in la Hubiyo in shaqaalahaas si ku filan loo hagay loona tababaray si joogto ah ka hor inta aan la dirin, isticmaalka xoogga iyo hab-dhaqanka habboon (sida lug lahaanshaha rayidka iyo militariga ee mashruuca, tacadiga iyo ka faa'iidaysiga galmada (SEA) iyo Dhibaatayn galmo (SH), iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah), sida ku qeexan Buugga Hawlgalka Mashruuca, SMP, Qorshaha Maareynta Amniga iyo habraaca maaraynta shaqaalaha (LMP).</p> <p>e) In la Hubiyo in hawlaha ka-qaybgalka daneeyayaasha ee Qorshaha Ka-qaybgalka Daneeyayaasha (SEP) ay ku jiraan istaraatiijiyada isgaarsiineed ee ka-qeybgalka ciidamada iyo shaqaalaha amniga ee mashruuca.</p> <p>f) In la Hubiyo in wixii tabasho ah ama cabasho ah ee ku-aaddan hab-dhaqanka ciidamada iyo nabadsugidda la helo, la kormeero, la diiwaangeliyo (iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo ilaalinta kalsoonida) laguna xalliyo habka cabashada ee Mashruuca. Shilalka amniga la xiriira waa in lagu wargeliyaa Ururka si waafaqsan tallaabada B ee qorshaha ballanqaadyada deegaanka iyo kuwa bulshada (ESCP). Meesha uu Ururku u baahan doono, ka dib marka lala tashado Amaahiyaha (i) in uu si degdeg ah u magacaabo lataliye kormeere oo dhinac saddexaad ka imaanaya, kaas oo leh shuruudaha tixraaca, shahaadooyinka iyo waayo-aragnimada ay ku qanacsanyihiin Bankigu, si uu u booqdo oo u kormeero aagga Mashruuca ee la geeyo ciidamada iyo kooxaha amniga, ururinta xogta ku habboon oo la xiriirta daneeyayaasha mashruuca iyo ka faa'iidaystayaasha. (ii) Waxaa looga baahan yahay lataliyaha kormeeraha ee dhinaca saddexaad inuu diyaariyo oo uu soo gudbiyo warbixinnada kormeerka, kuwaas oo si dhakhso ah loo heli karo, laga lana hadli doono Ururka. iii) In si dhakhso ah u qaado tallaabo kasta, sida inay codsato Ururka markay dib u eegis ku sameeyaan warbixinaha lataliyaha kormeeraha dhinac saddexaad.</p>		
<b>ESS 5: LAHAANSHAHA DHULKA, XANNIBAADAHA ISTICMAALKA DHULKA IYO DIB-U-DEJINTA KHASABKA AH.</b>			
5.1	<p><b>QORSHAYAASHA DIB U DEJINTA:</b></p> <p>Qabso Qaabdhismeedka Qorshaynta Dib-u-dejinta waxa la shaaciyay 27kii Maarj 2022 iyadoo la raacayo Qaabdhismeedka Qorshaynta Dib-u-dejinta (RPF), diyaari, qaadashada oo si guud u soo bandhig, Qorshe Hawleedka Dib-u-dejinta ee gaarka ah (RAPs) ama Qorshayaasha Soo Celinta Hab-nololeedka (LRPs) iyo Shuruudaha ku-deeqidda dhulka/heshiisyada dhulka ee ay dhexdhexaadisay dawladdu sida waafaqsan halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada 5aad (ESS5) sidoo kale waafaqsan shuruudaha Qaabdhismeedka Qorshaynta Dib-u-dejinta (RPF) si ay u aqbalaan Ururka; iyo</p> <p>Intaa ka dib, u dhaqangeli Qorshe Howleed –yada dib u dejinta iyo Qorshayaasha Soo Celinta Hab-nololeedyada (LRP) kala duwan, si waafaqsan Ururka.</p>		Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)
5.2	<p><b>BARAKICIN QASAB AH KAHOR INTAAN MASHRUUCA LA ANSIXIN</b></p>		

	<p>Dhammaan dhul-wareejinta mashruuca waxa la filayaa in la fuliyo sida ku cad qodobka 5.1 ee sare. Xaaladda gaarka ah ee qiimeynta mashruuc-hoosaadyadaa iyo qiimeynta saxda ah ay caddeyso in dib-u-dejin aan khasab aheyn ama barakacin khasab ah ay ka dhacday filashada dhismaha ama kaabayaasha kale ee mashruuca lagu maal-galiyo ka hor inta aan la ansixin guddiga mashruuca, ama maqnaanshaha Qorshe Howleedka dib-u-dejinta/Qorshayaasha Soo Celinta Hab-nololeedka (LRPs) oo loo diyaariyey nidaam uu Aqbali karo Ururka, mashruuc-hoosaadku wuxuu noqon doonaa mid aan xaq u lahayn haddii shuruudaha halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada ee 5aad (ESS5) ee khuseeya lagu qancin karo dib-u-dhac iyo Ururku si gaar ah u oggolaado dib-u-celinta codsiga.</p> <p>Haddii kale, Ururku ma taageeri doono horumarinta kaabayaasha noocaas ah, mashruuc-hoosaadkuna uma qalmi doono in lagu daro Mashruuca.</p>	<p>Baadhitaanka iyo sahanka tirakoobka inta lagu guda jiro habka Qorshaha Waxqabadka Dib-u-dejinta ee mashruucyada hoos yimaada si loo xaqiijiyo in barakacii hore ee khasabka ahaa uu dhacay iyo in kale shuruudaha dib-u-dejinta ee la aqbali karo si loogu daro Qorshe Hawleedka Dib-u-dejinta ka hor inta aan la ansixin mashruuc-hoosaadka iyo Xayaysiinta qandaraasyada Tallaabooyin dib-u-noqosho ah ayaa la hirgeliyay iyada oo qayb ka ah Qorshaha Waxqabadka Dib-u-dejinta.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
<p><b>ESS 6: ILAALINTA KALA DUWANAASHAHA NOOLAHA IYO MAARAYNTA JOOGTADA AH EE KHAYRAADKA DABIICIGA AH</b></p>			
<p>6.1</p>	<p><b>KHATARAHA IYO SAAMEYNTA NOOLAYAASHA:</b> Si waafaqsan ESMF, hubi in baaritaanka halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada 6aad(ESS6) ee la fuliyay iyo tallaabooyinka la xiriira in lagu daray Qorshaha Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMP) ee mashruucyada hoose, iyo in tallaabooyinkan la qaato loo fuliyo si waafaqsan Xeerarka Ururka.</p>	<p>Diyaarinta iyo La qabsiga oo si cad u loo shaaciyo Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada ka hor inta aan la hirgelin mashruucyo-hoosaadyada gaarka ah ee goobta</p> <p>Samee Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada inta lagu jiro hirgelinta mashruuca.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
<p><b>ESS 7: SHUCUUBTA ASALAGI AH/BULSHOOYINKA DHAQAMEEDKA EE KU NOOL AFRIKADA SAXARAH KA HOOSEEYA</b></p>			
	<p>Iyadoo lagu salaynayo warbixinta ku haboon ee Baanka Adduunka ee ku saabsan ku dhaqanka halbeega.</p>	<p>Kahor inta aan aag laga bilaabin wax shaqo ah</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>

	<p><b>“Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha”</b> waxa ay fulin doontaa qiimayno heer-hoosaad ah oo tilmaamaysa joogitaanka dadka deegaanka ah/dhaqanka ka hooseeya Saxaraha Afrika ee taariikh ahaan bulshooyinka maxaliga ah ee aan loo adeegin ee dagan aagga mashruuca laga fulinayo iyo halka laga helo waxay diyaarin doontaa qorshayaasha dadka deegaanka ah si waafaqsan Ururka.</p>	<p>Deegaan kasta ka hor inta aan la hirgelin mashruuc-hoosaadyo.</p>	
<p><b>ESS 8: HIDDAHA IYO DHAQANKA</b></p>			
8.1	<p><b>HIDDAHA DHAQANKA IYO HELITAANKA FURSADAHA:</b> Iyadoo la raacayo Qaabdhismeedka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMF) in la hubiyo in tallaabooyinka la xidhiidha halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada 8aad (ESS8) lagu daro Qorshaha Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMP) mashruuc-hoosaadyo iyo in tallaabooyinkan oo kale la qaato oo loo fuliyaanyo si waafaqsan Ururka. Hirgelinta - haddii ay khuseyso - habka helitaanka fursada lagu qeexay Qaabdhismeedka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMF) kaas oo lagu dari doono goobta Qorshahayaasha Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMP) gaarka ah.</p>	<p>Diyaarinta iyo La qabsiga oo si cad u loo shaaciyo Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada ka hor inta aan la hirgelin mashruucyo-hoosaadyada gaarka ah ee goobta</p> <p>Samee Qorshaha Maamulka Deegaanka iyo Bulshada, oo ay ku jirto u hoggaansanaanta habraacyada fursad-helidda, inta lagu jiro hirgelinta mashruuca.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
<p><b>ESS 9: DHEXDHEXAAD MAALIYADEED</b></p>			
	<p>Mashruuca ma khuseyso</p>		
<p><b>ESS 10: KA QAYBGELISTA DANEEYAYAASHA IYO MACLUUMAAD SIIN</b></p>			
10.1	<p><b>QORSHAHA KA QAYBGALKA DANEEYAYAASHA IYO FULINTIISA:</b> Waxa mashruuca la shaacin doonaa 27<sup>th</sup> Maarso 2022 uuna dhaqangeli doonaa.</p>	<p>Inta uu socdo hirgelinta Mashruuca.</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>
10.2	<p><b>HANNAANKA CABASHADA EE MASHRUUCA:</b> Waa ina la sameeyo lana hawlgeliyo hab la aamini karo, oo ah hannaan cabashoah sida lagu qeexay SEP.</p>	<p>Ka hor inta aan la bixin qaybta laad iyo in la ilaaliyo inta uu socdo mashruuca</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>

	Waa in cabasgooyinka la heli karo, waana in loo diyaariyaa si guud, lana fudadayn karo xallinta khilaafaadka iyo cabashooyinka mashruuca si waafaqsan shuruudaha halbeegyada deegaanka iyo kuwa Bulshada ee (ESS10)		
<b>CAPACITY SUPPORT (TABABAR)</b>			
CS1	<p>Qiimayn hordhac ah, ee awooda fulinta taasoo waafqsan shuruudaha E&amp;S Taasoo qayb diyaarinta Qaabdhismeedka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (ESMF), waxaana loo cusboonaysiin doonaa sida loogu baahdo ka dib soo saarista khabiirada ee aan E&amp;S.</p> <p>Qiimaynta wax aka mid ah shuruudaha tixraaceed, qorshe hawleedyada iyo waqtiga shaqada dhisida awood ay ku jiraan la talin ito tababaro.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qaab-dhismeedka Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka guud ahaan;</li> <li>• Khariidaynta daneeyayaasha iyo hawlgelinta;</li> <li>• Arrimaha Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada iyo Bulshada (sida tallaabooyinka Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada ee baxnaaninta, dhismaha iyo dayactirka);</li> <li>• Maamulka Shaqada;</li> <li>• Dhinacyada gaarka ah ee qiimaynta deegaanka iyo bulshada oo ay ku jiraan diyaarinta qalabka E&amp;S sida Qorshaha Maamulka Deegaanka iyo Bulshada, Qorshe Hawleedka Dib-u-dejinta iyo LRPs, ka hor tagga Ka Faa'iidaydiga Galmada Xadgudubka iyo dhibaataynta (SEAH) iyo Qorshayaasha ka Jawaabida, Qorshayaasha Maareynta Amniga;</li> <li>• Tacadiyada ku salaysan Jinsiga (GBV); iyo</li> <li>• Maareynta Cabashada;</li> <li>• Amniga iyo maamulka biyaha.</li> </ul> <p>Kooxaha muhiimka ah waxaa kamid ah kuwaan soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Unugga Iskuduwidda Mashruuca Qaranka ee Wasaaradda Tamarta iyo BIyaha XFS;</li> <li>• Uungta Hirgelinta Mashruuca ee Heer Maamul-Goboleed;</li> <li>• Contractors/subcontractors/primary suppliers and their project workers;</li> <li>• Guddiyadda Horumarinta Tuulooyinka (VDCs);</li> <li>• Shirkaddaha ka shaqeeya Tayaynta iyo Xoojinta Hay'adaha;</li> <li>• Bulshooyinka ka faa'iidaysta; iyo</li> <li>• Daneeyayaasha muhiimka ah.</li> </ul>	<p>Kahor hirgelinta hawlaha hoos yimaada qaybta laad</p> <p>Tababarka ayaa la fulin doonaa inta uu socdo Mashruuca sida loo baahan yahay.</p> <p>Tababarka ayaa la fulin doonaa inta uu socdo Mashruuca sida loo baahan yahay</p>	<p>Unugga Iskuduwidda Mashruuca ee Qaranka (NPCU)</p>

